

Waxaan rabnaa in aan warkaaga maqalno!

Waaxda Adeegga Bulshada ee Minnesota (The Minnesota Department of Human Services (DHS) waxay ka shaqaynaysaa websaydka **cusub si ay dadka si dhakhso ah ugu xirto taageero iyo adeeg.**

Sahankaaga waa in la dhammaystiraa marka la gaaro **Luuliyo 19, 2021** si aad u gasho qoriturka.

Waxaa laguugu dari doonaa qoritur loogu talagalay 15 kaarar hadiyad \$20 ah iyo abaalmarin guud oo ah kaar hadiyad oo \$100 ah oo dookhaaga ah Amazon, Target, Cub Foods, ama Walmartadiga oo lagaaga mahad-celinayo dhammaystirkaaga sahanka.

[Fadlan buuxi sahkankaan adiga oo isticmaalaya lifaaqaan waxaadna DHSu sheegtaa waxa muhiimka kuu ah.](#)

Waxyabaha kale ee ay tahay in aad oggaato:

- Waa in da'daadu ahaataa **18 sano** ama aad ka weyntahay oo aadna ku nooshahay Minnesota.
- Sahanku wuxuu qaadanayaa ku dhawaad **10 daqiiqo** si loo dhammaystiro.
- Jawaabahaaga sahanku waxay si toos ah u aadi doonaan Wilder Research waxaana lagu dari doonaa jawaabo dad kale kahor inta aan lala wadaagin DHS. **Jawaabahaaga shakhsiga ah waa kuwo qarsoon cidna lalama wadaagi doono.**
- **Haddii aad hesho iyo haddii aadan helinba kaalmada dadweynaha ama adeegyo, fadlan buuxi sahanka.** Wax ku biirintaadu waa muhiim wax kastaba ha noqotee.
- Go'aankaaga ku saabsan in aad qaadato iyo in aadan qaadan sahanka iyo macluumaadka aad nala wadaagto **ma saamayn doonto xiriirka aad la leedahay DHS** ama dheefaha kale ee aad qaadato. Sidoo kale, isuma diiwaangalin kartid adeegyo adiga oo buuxinaya sahanka.
- Marka aad gasho lifaaqa sahanka, waxaad heli doontaa xulasho aad sahanka ku buuxinayso luuqadaha **Ingiriis, Spanish, Soomaali, Hmong, Ruush, Vietnamese, Shiinays (fudud), iyo Shiinays (asalka ah).** Sahanka waxaa sidoo kale laga heli karaa **shaashad akhriye.**

- **Wixii khuseeya su'aalaha ku saabsan sahanka ee aad u baahan tahay in lagu akhriyo sahanka**, fadlan la xiriir Laura Schauben oo ku sugan Wilder Research (651-280-2655, laura.schauben@wilder.org).
- **Wixii su'aalo ah oo ku saabsan websaydka cusub**, fadlan la xiriir Kate Kunitz oo ku sugan DHS (kate.kunitz@state.mn.us).

Fikradahaaga iyo khibradahaagu waa kuwo muhiim ah! Waxaad naga caawin kartaaDHS in aan bixino qaab fudud oo dhakhso ah si aad u hesho waxaad u baahan tahay, marka aad u baahato. Haddii aad taqaano dad kale oo danaynaya dhammaystirka sahanka, fadlan la wadaag macluumaadkaan.